

# Macluumaadka muhiimka ah ee **waalidiinta** ee la xidhiidha **tallaalka dhalinta**

Markay ilmuhu weynaadaan, kahortagga ay ka helayeen tallaaladii ay carrurnamadii qaateern wuxuu bilaabaa inuu baaba’o. Dhalintu waxay iyana halis u yihiin jirrooyin kale oo halis ah oo laga hortagi karo. Ku hay fayoqab oo la soco tallaalkooda gaar ahaan kuwa lagu taliyo ee da’dooda. Dhakhtaradu waxay ku taliyaan dhawr tallal laga bilaabo baadhitaanka guur ee sannadka 11-12.



## Tallaalada lagu taliyo ee dhalinta iyo jirrooyinka ay ka hortagaan

### **Meningococcal**

**Jirrada:** Jirrada Meningococcal waa infekshan halis ah oo khadadka ku meegaarsan maskaxda iyo laf dhabrta ku dhaca. Jirradu waxay ku faaftaa la xidhiidhka qof qaba qufaciisa, dhunkashada, ama wadaagga waxuun afka ah, sida dhalada biyaha. Waxay keeni kartaa kolba-aariyo, keenta dhaawc maskaxda ah, maqalka ama addin beel, iyo dhimasho.

**Tallaalka:** Da’da dhalinta yaryar waa inay qaataan tallaalkan muddada baadhitaanka guud ee sannadka 11-12. Haddii uu ilmahaagu ka baaqdo tallaalkan wakhtigaas, u qabo ballan u ku qaato hadda – marnaba ma laha daahitaan!



### **Pertussis (“kixda”)**

**Jirrada:** Pertussis (kixdu) waxay si dhib yar ugu faaftaa qufaca iyo hindhisada. Waxay keentaa qufac aan joogsi lahayn oo dhib ka dhiga cunista, cabista, ama neefsiga. Pertussis nafta ayuu halis gelin karaa dhallaanka iyo dumarka uurka leh.

**Tallaalka:** Qaadasho keliya oo Tdap ah ayaa lagu talinayaa baadhitaanka sannadka 11-12, laakiin waa la siin karaa dhalinta waaweyn (iyo dadka waaweynba). Tallaalkani wuxuu ka hortagaa teetanada, diphtheria iyo pertussis (kixda).



### **Human Papillomavirus**

**Jirrada:** Human papillomavirus (HPV) waa faayras caan ah oo ah sababta ugu weyn ee keenta kansarka makaanka ee dumarka.

**Tallaalka:** Tallaalkan waxa lagu taliyey da’da 11-12 sanno ee hablaha, laakiin waa la siin karaa illaa da’da 27. Tallaalku wuxuu siiyaa kahortagga ugu weyn marka ay habluhu qaataan dhammaan saddexda qadasho kahor intaanay la kulmin faayraska HPV. Haddii gabadhaada dhagalinta ahi ay ka baaqato qaadashada tallalka marka ay tahay 11 ama 12, weydii dhakhtarkeeda ama kalkaalisada siday ku heli lahayd hadda.



**Dhalintaada tallaal ayaad ku badbaadin kartaa caafimadkooda iyo ammaankooda!**

# Ka hubi dhakhtarka ama kalkaalisada ilmahaaga haddii tallaalu u dhan yihiin ka ilaalinaya jirrooyinka soo socda:

- ✓ **Hargab xilliyeedka (ifilada)** waa fayras si dhib yar ugu faafa qufaca iyo hindhisada. Ifiladu waxay keeni kartaa kolba-aariyo, dhibaatooyin wadnaha ah, iyo dhimasho. Fiiro: Tallalka hargab xilliyeedku kama ilaalin karo hargabka H1N1 (doofaarka).
- ✓ **Cagaarshow A (HepA)** waa faayras laga helo xaarka qofka qaba. Waxay keeni kartaa jirro beerka ah.
- ✓ **Cagaarshow B (HepB)** waxay keeni kartaa infekshan abd ah, dhaawac beerka ah, kansarka beerka, iyo dhimasho.
- ✓ **Jadeecada, Qaamow Qashiirka iyo Jadeeco-Jarmalka “Measles, Mumps and Rubella (MMR)”** dhamman waxay si dhib yar ugu faafaan qufaca iyo hindhisada. Kuwaasi waa kuwa ugu halisan ee tallal looga hortagi karo waayo waxay keeni karaan jirro ba’an oo si sahlan u faafta.
- ✓ **Dabaysha “Polio (IPV)”** si aad ah ayaa loo kala qaadaa. Waxay keentaa calaamado hargab u eg, laakiin keeni kara faalij iyo dhimasho.
- ✓ **Busbuska (chickenpox)** si aad ah ayaa look ala qaadaa. Waxay keentaa finan, cuncun, iyo qandho. Waxay keeni kartaa infekshan maqaarka ah, kolba-aariyo, dhawaac maskaxda ah, iyo dhimasho.

**Gargaarka helitaanka bixiye daryeel caafimaad ama kiliinig tallal, wac ama booqo:**



**Public Health**   
Seattle & King County

[www.kingcounty.gov/health/immunization](http://www.kingcounty.gov/health/immunization)



Waxa lagu heli  
qaababka kale